**RIKU WUXUU LEEYAHAY ADEEG GAAR AH OO LAGU TALAGALAY DADKA LA KULMA DHIBAATOOYINKA KA GANACSIGA JIRKA AMA XADGUDUBYO LAMID AH**

## Nala soo xariir haddii:

- Lagugu khiyaameeyay xaalad aadan ka bixi karin adoon dhibaato la kulmin.
- Qof kaa faa'iidaysanaayo tusaale ahaan, sida inuu ku siiyo mushaar aad u yar, wax kugu qasbo ama ku handado si aad u oggolaato waxyaabo galmo la xariira, galo dembiyo ama sameeyo qof kale oo aadan raali ka ahayn.
- Qof kugu maamulo waxa aad sameyneyso, meesha aad aadeyso, cidda aad la hadlayso ama sida aad u isticmaalayso lacagtaada.
- Uu qof isku dayo inaad aqbasho waxa uu rabo sida inuu ku saaro cadaadis ama hanjabaad tusaale ahaan, ayadoo uu muujinaayo wax kuu gaar ah, lagugu sameeyo musaafurin, lagugu dacweeyo laamaha amniga, ama kuu geysto waxyello ama u geysto xubno ka tirsan qoyskaaga.
- Qof kugu dalaco lacag sababo la xariira imaanshaha Finland, tusaale ahaan si aad u hesho shaqo ama fiiso
- Aad si joogto ah u shaqeyso in ka badan 8 saacadood maalintii ama saacadaha dambe adiga oo aan lacag dheeraad ah qaadan; aad hesho celcelis ahaan wax ka yar 2 maalmood asbuucii ama aadan helin fasax jiro ood mushaar kusii heleyso ama fasax sanadeed.
- Aad ka baqeyso in qof uu dhibaato kuu geysto haddii aad ka tagto guurkaaga ama xiriirkaaga, ama lagugu qasbay xiriir.

Haddii mid ka mid ah arrimahaan jiraan, ama aad ka shakisan tahay in adiga ama qofka kuu dhow la kulmay dhibaatada ka ganacsiga dadka ama xadgudub la mid ah sabab kale oowgeed, fadlan nagala soo xiriir taleefanka ama fariin:

**+358 40 632 9293**
ama iimaylka **help@riku.fi**

RIKOSUHRIPÄIVYSTYS
VICTIM SUPPORT FINLAND

# Laanta Taageerada Dhibanaha Finland (Victim Support Finland, RIKU)

waxay hagaysaa oo taageertaa dhibanayaasha dembiyada, dadka qaraabada ay yihiin iyo marqaatiyada dembiyada.

OONLEEN

AYADOO LA ADEEGSANAA YO TALEEFAN

FOOL KA FOOL

**La xiriir Laanta Taageerada Dhibbanaha Finland (RIKU) si aad u hesho talo iyo taageero haddii:**

- aad la kulanto ama aad ka shakisan tahay inaad dhibane u tahay dembi
- aad indhahaaga ku aragto dembi
- qof kuu dhaw la kulmo dembi

Adeegyadeenu waa kuwo si buuxda qarsoodi u ah. Waad nala soo xariiri kartaa, sidoo kale waa qarsoodi, marka aad wali ka fikirayso inaad dembi soo sheegto iyo in kale. Waxaan ku siin karnaa xog ku saabsan waxa ay ka dhigan tahay waxaana kaa caawin karnaa sameynta warbixinta dembiga haddii aad doorato inaad sidaas sameyso.

**Fadlan ogsoonoow:**

- Ma siin doono xog adiga ama kiiskaaga ku saabsan qof anagoo oggolaanshahaaga haysan.
- Ma ahan inaad na siiso xog gaar ah oo ku saabsan kiiskaaga marka aad nala soo xiriirto.
- Mar walba waxaan isticmaalnaa turjubaano qarsoon oo xirfadley ah haddii aadan ku hadlin afka Finnish-ka, Iswidish ama Ingiriis.

OONLEENKA

→ **Riku.fi/trafficking**
→ **Riku.fi/labor-exploitation**

Iimaylka **help@riku.fi** si aad u hesho taageero qarsoodi ah iyo tallo haddii aad ka shakisan tahay ka ganacsiga dadka ama in shaqadaada lagaaga faa'ideysanaayo.

FOOL KA FOOL

Marka loo baahdo, waxaan kugula kulmi karnaa xafiisyada RIKU.

Marka la heli karo, waxaan ku siinaynaa qof u tababaran taageerada saldhiga booliiska ama maxkamada.

AYADOO LA ADEEGSANAAYO TALEEFAN

**Laynka caawimaada dhibanayaasha ka ganacsiga dadka iyo dadka xadgudubyada loo geysto +358 40 632 9293**

Isniinta-Jimcada 1 PM ilaa 4 PM
Wac ama fariin u dir

**Waxaad nagula soo xariiri kartaa luuqadaada.**

RIKU waa urur aan dawli ahayn (NGO) oo aan ku xirnayn siyaasada ama ururo diin.